



JAMHUURIYADDA SOMALILAND

Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta

SIYAASADDA WARBAAHINTA QARANKA

HARGEYSA, 2020

TUSMADDA

WEEDHA WASIIRKA	6
EREYADA LA SOO GAABSADAY	8
CUTUBKA KOOWAAD:	9
HORDHAC	9
1.1 Xaaladda Guud ee Warbaahinta Somaliland	9
1.1.1 Warbaahinta maqal-baahiyaha.....	10
1.1.2 Warbaahinta Qoraalka ah	12
1.1.3 Warbaahinta Maqal-Muuqaal-baahiyaha	12
1.1.4 Warbaahinta <i>Internet</i> -ka iyo Degel-wareedka	13
1.2 Caqabadaha Guud ee Warbaahinta	13
1.3 Caqabadaha Gaarka ah ee Noocyada Warbaahinta	14
1.3.1 Warbaahinta maqal baahiyaha	14
1.3.2 Warbaahinta Qoraalka ah	14
1.3.3 Warbaahinta Maqal/Muuqaal-baahiyaha ah.....	15
1.3.4 Warbaahinta Filimmada.....	15
1.3.5 Warbaahinta <i>Internet</i> ka iyo Degel-wareedka	16
1.4 Muhiimadda Siyaasadda	16
CUTUBKA LABAAD:	18
UJEEEDADDA IYO XAYNDAABKA SIYAASADDA	18
2.1 Ujeeddada Guud ee Siyaasadda	18
2.2 Ujeeddooyinka Gaarka ah ee Siyaasadda.....	18
2.3 Xayn-daabka Siyaasadda	19
2.4 Mabaadiida Hagaya Siyaasadda Warbaahinta Qaranka.....	20

I. Xoriyadda Cabbirka Aragtida.....	20
II. Madax-bannaanida Warbaahinta.....	20
III. Horumarinta Xirfadda iyo Aqoonta Mihnada Warbaahinta	20
IV. Hellida iyo Faafinta War xaqiiq ah.	21
V. Isla-xisaabtan iyo Daahfurnaan	21
VI. Kobcinta wacyiga bulsho, aqoonta iyo qiyamka dawladdnimada.....	21
2.5 Xuduudaha Sharci ee Siyaasadda	22
2.5.1 Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.....	22
2.5.2 Xeerka Kala Xadaynta Nidaamka Xukuumada Iyo Haya'daha Madaxa-Bannaan (Xeer no.71/2015)	22
2.5.3 Xeerka Saxaafadda (Lr. 27/2004)	23
2.5.4 Qorshaha Horumarinta Qaranka ee 2aad	23
2.5.5 Istaraatijadda Fog iyo Qorshe-sannadeedka 2020	24
CUTUBKA SADDEXAAD:	26
TILMAAMAHA IYO MASUULIYADDA WARFIDIYEENNADA	26
3.1 Hordhac	26
3.2 Masuuliyadda Warfidiyeenada	26
3.2. 1 Xaqiiq iyo Sugnaansho:	26
3.2.2 Madax-banaanida iyo dhexdhexaadnimada	27
3.2.3 Daacadnimo.....	27
3.2.4 Ilaha Warka	28
3.2.5 Faaf-reeb	28
3.2.6 Isla-xisaabtanka	28

3.2.7 Is-dhaafsiga Xogta	29
3.2.9 Badbaadinta Carruurta.....	30
3.2.10 Addeegsiga Muuqaaladda iyo Magacayada	30
3.2.11 Duubista Waraysiyada iyo Wada sheekaysiga Teleefoonka	30
3.3 Masuuliyadda Tifaf-tirayaasha	31
3.4 Xuquuqda Warfidiyeennada	31
3.5 Horumarinta Xirfadda iyo Aqoonta Warfidiyeennada	31
3.6 Diiwaangelinta Suxufiga.....	32
CUTUBKA AFARAAD:	33
TILMAAMAHA IYO HANNAANKA HAYA’ADAHA WARBAAHINTA ..	33
4.1 Hordhac	33
4.2 Noocyada Haya’adaha Warbaahinta	33
4.3 Tilmaamaha Haya’adaha Warbaahinta	33
4.3.1 Warbaahinta Dadweynaha	34
4.3.2 Warbaahinta Gaarka loo leeyahay	34
4.3.3 Warbaahin Bulsho	34
4.4 Hannaanka Haya’adaha Warbaahinta	34
4.4.1 Warbaahinta Qoraal ah.....	35
4.4.2 Warbaahinta maqal-baahiye	35
4.4.3 Warbaahinta Maqal-muuqaal baahiye.....	35
4.4.4 Warbaahinta Degel-Wareed.....	35
4.5 Diiwaangelinta Haya’adaha Warbaahinta.....	36
4.6 Lahaanshiyaha Haya’adaha Warbaahinta	36
4.6 Helitaanka Xogta ee Haya’adaha Warbaahinta	37
4.7 Nidaamka iyo Anshaxa Haya’adaha Warbaahinta.....	37
CUTUBKA SHANAAD:	38

HIRGELINTA, QIIMEYNTA & DIB-U-EEGISTA SIYAASADDA	38
5.1 Hirgelinta Siyaasadda.....	38
5.2 Kormeeridda iyo Qiimeynta Hirgelinta Siyaasadda	39
5.3 Diyaarinta Istratijiyadda iyo Qorshaha Siyaasadda.....	39
6.4 Dib-u- eegista Siyaasadda.....	40

WEEDHA WASIIRKA

Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta JSL, muddo ku siman 29 sannadood, ma ay lahayn siyaasadda qoran oo lagu maamulo Warbaahinta Qaranka. Taas oo ka dhigaysa in aanay warbaahinta guud ahaan faham fiican ka haysan nidaamka maamul ee Wasaaradda iyo jihada ay qaadayso warbaahintu si ay gudato waajibaadkeeda shaqo ee la xidhiidha gudbinta xog ku dhisan xogogaalnimo iyo dhexdhexaadnimo.

Hadaba, aniga oo dareensan baahidaas culus ee jirta oo ay adkaanayso xidhiidhka wada-shaqayneed ee ka dhexeeya Wasaaradda Warfaafinta iyo daneeyayaasha warbaahinta, waxa aan garawsaday in la curiyo Siyaasadda Warbaahinta Qaranka, taas oo dammaanad qaadaysa warbaahin xor ah oo ay hagayaan Dastuurka Qaranka Jamhuuriyada Somaliland, xeerarka kale ee dalka iyo mabaadiida caalamiga ahba.

Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta JSL, iyadda oo ku taagan talada iyo tilmaanta **Madaxwaynaha JSL Mudane Muuse Biixi Cabdi** ee ah in la kobciyo Warbaahinta Qaranka, si ay u tabiyaan warar iyo warbixino sugan oo kor-u-qaada qadiyadda jiritaanka Somaliland, isla markaana dhawrta midnimadda shacabka iyo madaxbannaanida qaranka, waxa ay u guntatay in la dejiyo siyaasad dhiirrigelinaysa warbaahin madax-bannaan oo mihnad yaqaan ah.

Haddaba, talo-wadaagga lagu dhamaystiray geeddi-socodka curinta Siyaasadda Warbaahinta Qaranku ma ay noqdeen kuwa midho-dhala haddii aanay iskaashi ka wada yeelan dhammaan daneeyayaasha kala duwan ee ay khusayso Siyaasaddu. Waxa aana halkan ugu mahadnaqaynaa dhammaan cid kasta oo ka qaybqaadatay curinta siyaasadda, kanna dhiibatay talo, tilmaan iyo toosinba hannaanka Siyaasadda Warbaahinta Qaranka. Waxa aan si gaar ah uga xusi karnaa ururrada warbaahinta (SOLJA, WIJA, FIMO, SIBA, Ururka Mareegaha), ururada bulshadda

Rayidka ah (Xarunta Dhaqanka ee Hargeysa, Xarunta Xuquuqul Iinsaanka, SONSAF), haya'daha caalamiga ah gaar ahaan BBC Media Action, Jaamacadda Hargeysa iyo Xafiiska Dawladda Ingiriiska ee Hargeysa.

Sida oo kale waxa mahad iyo qadarinba mudan cid kasta oo ay wada-shaqayni na dhexmartay intii uu socday hannaanka curinta siyaasaddu, kuwaas oo aanan magacyadooda halkan kuwada koobi karin, iyaga oo ka kala socday wasaaradaha, aqoonyahanada warbaahinta, garyaqaannada iwm. Waxa ammaan mudan Waaxda Qorshaynta Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta JSL (gaar ahaan Agaasimaha Waaxda *Cabdiqaadir Dayib Askar* iyo Madaxa Siyaasadda iyo Qorshaynta *Faysal Cabdirashiid Aadan*) oo dadaal dheer u galay in ay rumeeyaan riyoooyinkii ugu waaweynaa ee ay Wasaaraddu lahayd tan iyo aasaaskii jiritaanka Somaliland.

Guntii iyo gunnaanadkii, waxa aanan ku rejo weynahay in Siyaasadda Warbaahinta Qaranku noqon doonto mid kor u qaadda habka adeeg bixinta Warbaahinta, isla markaana qeexda nidaamka wada-shaqayneed oo dhexmara Wasaaradda iyo daneeyayaasha Warbaahinta oo ku dhisan ilaalinta qaddiyadda madax-bannaanida iyo amniga guud ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh.

Mudane. Saleebaan Yuusuf Cali (Koore)

Wasiirka, Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta

Jamhuuriyadda Somaliland

EREYADA LA SOO GAABSADAY

BBC	-	British Broadcasting Company
FIMO	-	Female in Media Organizations
JSL	-	Jamhuuriyadda Somaliland
SIBA	-	Somaliland Independent Broadcasters Association
SONSAF	-	Somaliland Non-State Actors Forum
SOLJA	-	Somaliland Journalists Association
WIJA	-	Women in Journalists Association
WWDH&W	-	Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta

CUTUBKA KOOWAAD:

HORDHAC

1.1 Xaaladda Guud ee Warbaahinta Somaliland

Dalka Jamhuuriyadda Somaliland, tan iyo markii uu la soo noqday madaxbannaanidiisa 18kii May 1991kii, waxa ka hirgalay hannaan warbaahineed oo xor ah, meeshana ka saaray cabudhintii iyo faaf-reebkii ay dawladdii kala-taliska ah ee Siyaad Barre dhaqanka ka dhigatay. Hadaba, warbaahinta waxa ay la soo kobcaysay dawladdnimadda Somaliland oo ku aasaasan nidaam iyo qiyam dimuqraadiyadeed. Korodhka iyo horumarinta warbaahinta Somaliland weli waa kuwa socda oo la jaanqaadaya hadba xilliga la marayo iyo duruufaha taagan – waxa ay la jaanqaadaysa horumarka iyo isbeddelka bulsheed, kan siyaasadda, kan dhaqaalaha, kan dhaqanka iyo aqoonta, iyo kan tiknoolojiyada casriga ah ee noocyada iyo qaababka kala geddisan ee warbaahinta.

Somaliland haatan waxa ay sumcad wanaagsan ku leedahay xorriyadda hadalka iyo cabbirka fikradaha, marka loo eego waddamo badan oo caalamka ku yaal iyo kuwa Geeska Afrika ahba. Heerka ay Somaliland ka gaadhay warbaahinta xorta ah iyo helidda xogta dadweynuhu u baahan yihiin waxa lagu cabbiri karaa mid ka mid ah kuwa ugu horumarsan Qaaradda Afrika.

Sannaddkii 2001kii waxa la ansixiyey Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland. Kaas oo Qodobka 32-aad ee dastuurku uu dammaanad qaadayo xaqa xoriyatul-qawlka iyo madaxbannaanida saxaafadda xorta. Sidaas darteed, waxa lagamamaarmaan ah in xeerarkii iyo siyaasidihii ka

dheegmayey dastuurka, islamamarkaana qaabaynayey hannaanka lagu maamulayo Warbaahinta Qaranka la curiyo, lana dhamaystiro si ay u helaan xuquuq iyo waajibaad dhammaan noocyada saxaafadda ee dalku. Iyada oo laga duulayo jihada cusub ee ay warfaafintu qaaday, taas oo ah mid bixisa adeeg dadweyne oo ku dhisan nidaam dimoqraadi ah, waa in warbaahintu noqotaa mid mas'uul ah oo dhawrta sharciyada dalka, dhaqanka dadweynaha iyo diinta, anshaxa iyo xeerarka saxaafadda.

Sidaasi awgeed, Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta JSL waxa ay raacday dariiq ah in marka horeba ay si sugan u gudato hawlaheeda warbaahineed ee ah ka-haqabtirka dadweynaha warar sugan oo buuxa, oo ah kuwa gudaha iyo dibadaba, ee saameeya nolosha dadweynaha iyo horumarkooda ee ay danaynayaan, una helaan macluumaadkaasi si sahlan iyada oo la adeegsanayo qaababka casriga ah ee warbaahinta iyo warhelidda. Jihadaas cusub ee Warbaahinta Somaliland u jeedsatay waxa saldhig u ah wacyigelinta dadweynaha ee dib-u-heshiisiinta, adkaynta nabadgelyada, faafinta qaddiyadda Somaliland ee gooni-isku-taagga iyo qarannimada buuxda, ku-dhaqanka habka dimoqoraadiyadda iyo maamul-wanaagga, horumarinta dhaqaale, tan waxbarasho iyo adeegyada caafimaadka.

1.1.1 Warbaahinta maqal-baahiyaha

Warbaahinta maqal-baahiyuhu (ama Reedhyowgu) waa warbaahinta ugu caansan, uguna saamaynta balaadhan agabka warbaahineed ee ay ku wada-xidhiidhaan muwaadiniinta Dalka JSL. Taariikhda warbaahinta reedhyowguna waa mid ku lammaan taariikhda siyaasadeed ee dalka. Radio Hargeisa, oo ah idaacadii ugu horaysay ee af-soomaali ku hadashay, waxa la aasaasay sannadkii 1942kii (waxa la odhan jirey waqtigaasi 'Radio Kudu'), waxaana aasaasay maamulkii Ingiriiska ee waqtigaasi xukumi jirey

Somaliland. Dhanka kale maamulkii ingiriisku wuxuu hirgeliyey idaacaddii labaad ee af-soomaali ku hadasha 1955kii, taas oo ahayd BBCda.

Muddo ka bacdi, waxa loo sameeyey dhisme cusub oo ah xarunta haatan ee Wasaaradda Warfaafinta, waxana loo bixiyey Radio Hargeisa. Maamulkii Ingiriisku xilliyadii danbe wuxu ku kordhiyey qayb qaabilsan sawirrada iyo filimada, iyo weliba wargeys toddobaadle ah oo ku soo bixi jirey af-Ingiriisi oo la odhan jirey ‘War-Somali-Side’.

Markii Somaliland iyo Soomaaliya ay xoroobeen ee ay isku biireen, qaybtii warfaafinta ee Somaliland waxa lagu daray wasaaraddii warfaafinta ee Soomaaliya. Waxa la qaramayey madbacadihii ku yiilley Hargeysa. Wargeysyadii ka soo bixi jirey Somaliland, kuna soo bixi jirey afkafka Ingiriisiga iyo Carabigana – sida *al-Liwa* iyo *Qarni Ifriiqiya* -waa la xidhay. Waxa kale oo la qaaday oo loo raray Xamar qalabkii warqabadka.

Hase ahaatee Radio Hargeysa iyo waaxyihii kale ee warfaafinta ee ku yaallay ‘Waqooyi Galbeed’ sida tiyaatarradii iyo madbacadihii, waxay si weyn ugu dhex baaba’een dagaalladii kacdoonka ee Soomaaliya ee socdey ilaa 1991-kii. Ciidammadii xukuumaddii milateriga ahayd ee Siyaad Barre, waxay duqeeyeen oo si weyn u burburiyeen Laliyihii iyo dhismayaashii Radio Hargeysa; waxana la bililiqaystay istuudiyayaashii iyo kaydka kale. Waxa la burburiyey oo kale tiyaatarradii, madbacadihii iyo wixii qalab iyo agab yaalley.

1.1.2 Warbaahinta Qoraalka ah

Warbaahinta qoraalka ah ayaa iyana taariikh mug leh ku dhex leh Warbaahinaha ka hawlgala Somaliland. Wargeyskii ugu horeeyey ee Somaliland waxa la keenay magaaladda Hargeysa 1950kii. Kaas oo lagu soo daabici jiray Cadan, kunna soo bixi jiray luuqada Af-Carabiga, laguna magacaabi jiray *Al-Umma* (Ummadda). Waxa ku xigay saddex wargeys oo kala ah *Al-Liwa*, *Qarni Ifriiqiya* oo soo baxay 1958kii iyo *Al-Saraaha* oo soo baxay 1959kii. Sida hore loo soo sheegay, waxa 1953-1958 soo bixi jirey “War-Soomaali Sidihii”.

Markii dib loo xoreeyey Somaliland sannadkii 1991kii, waxa dib loo bilaabay soo-bixitaankii Jaraa’idka madaxabannaan sida Codka Hargeysa, Xorriyo, Jamhuuriya, iyo Geeska Afrika .. Maanta waxa ka soo baxa caasimadda Jamhuuriyadda XX wargeysa oo maalinle ama toddobaadle ah, kuna soo baxa Afsoomaali, Carabi iyo Ingiriisi ba.

1.1.3 Warbaahinta Maqal-Muuqaal-baahiyaha

Warbaahinta Maqal-muuqaal-baahiyaha (ama telefishanadu) waxa ay markii ugu horreysay ka hirgashay Dalka JSL July sannadkii 1997kii (kaas oo lagu magacaabi jiray Hargeysa TV). Muddooyinkii u danbeeyey telefishannada dalka ka hawlagalaa, gaar ahaan kuwa madaxbannaan, si xawli ah ayay u kordhayaan.

1.1.4 Warbaahinta *Internet*-ka iyo Degel-wareedka

Warbaahinta *Internet*-ka ku shaqaysa waxa ay markii ugu horaysay soo gaadhay Somaliland sannadkii 2001dii. Warbaahintan ayaa ah ta ugu da'da yar ee ka hawlgasha Somaliland, balse durba si xawli ah saamayn ballaadhan ugu yeelatay agabyadda kale ee warbaahinta iyo qaybaha kala duwan ee bulshada.

1.2 Caqabadaha Guud ee Warbaahinta

Horumarka Somaliland ay ka gaadhay adeegsiga qaybaha kala duwan ee warbaahinta waxa barbar socday caqabado u baahan in si cilmiyeysan wax looga qabto. Caqabadahaas kuwooda ugu mudan waxa mid ah in aanay jirin siyaasad guud oo lagu maamulo warbaahinta.

Dadka ku shaqeeya mihnadda saxaafadda oo badankoodu aan lahayn xirfaddii iyo aqoontii loo baahnaa. Taas oo sababta in ay ku xad-gudbaan anshaxa saxaafadda, isla markaana warfidiyeennadu ku geystaan xadgudubyo qofeed iyo mid qaranba.

Saxaafadda oo loo isticmaalo ganacsi iyo in dhaqaale laga raadiyo ayaa iyaduna ah caqabad kale, waxaanay sababtaa in saxaafaddu ka tagto dhex-dhexaadnimadii, loona adeegsado aalad dacaayadeed oo lagu faafiyo xog iyo warar aan sal iyo raad toona lahayn. Arrintaas oo dhaawac ku ah dawladnimada, isla markaana horseedi karta iska-horimaad bulsheed. Taas oo bud-dhig u ah in haya'adaha amnigu kula kacaan warbaahinta xadhig aan loo marin sifadii sharciga ahayd.

Dhanka kale, waxa caqabad ah in addeegsiga Warbaahinta Dawladdu ay marar badan ka soo noqoto fal-celin taban oo la xidhiidha in aanay muwaadiniinta iyo xisbiyadda qaranku si simman ugu helin fursad dhinac war-tebinta iyo barnaamijyadda kaleba.

1.3 Caqabadaha Gaarka ah ee Noocyada Warbaahinta

Noocyadda Warbaahinta ka hawlgasha Dalka JSL waxa ay mid kastaba la soo darsa caqabad u gaar ah oo dhibaato ku ah horumarkeeda, isla markaana ragaadisay in ay isbeddel togan oo degdeg ah sameeyaan. Haddaba, caqabadahaas kuwooda ugu mudan waa kuwa hoos ku faahfaahsan:

1.3.1 Warbaahinta maqal baahiyaha

Warbaahinta maqal baahiyaha ah ama idaacadaha ah waxa haysta caqabado baahsan oo ah in aanay jirin idaacadihii madaxa banaanaa ee ka hawl-geli lahaa guddaha Somaliland, marka laga tago idaacadda Qaranka ee Radio Hargeysa iyo idaacaddaha warbaahinta degel mareegaha ah qaar ka mid ah.

1.3.2 Warbaahinta Qoraalka ah

Caqabada ugu weyn ee soo foodsaartay Warbaahinta Qoraalka ah ayaa ah tartanka ay kula jirto Warbaahinta casriga ah ee mareegaha ama degel Wareedka. Kuwaas oo dhinaca war-tebinta, gaadhidda akhristayaal badan iyo dhaqaalaha lagu maamulaba ka fudud yahay warbaahinta qoraalka ah. Warbaahinta qoraalka ah, marka la barbardhigo warbaahinta degel-wareedka ah, waxa ay u baahan tahay kharashka daabacaada, shaqaalaha iyo hantida kale ee ma guurtada ah. Caqabadan u gaarka ah Warbaahinta Qoraalka ayaa horseedi kara in ay gebi-ahaanba saaxadda ka baxdo.

1.3.3 Warbaahinta Maqal/Muuqaal-baahiyaha ah

Warbaahinta Maqal-Muuqaal-baahiyaha ah (ama telefishanadda) ayaa iyaduna wajaahaysa caqabado kale oo hor leh. Caqabadaas oo ay ka mid yihiin xuquuqda mu'alifka/ ama lahaanshiyaha, taas oo warbaahinta degel wareedku markastaba ay xigato wararka maqal-muuqaal baahiyaha iyada oo aanay siin tixraaca, ama aan ka qaadan oggolaansho baahineed. Taas oo laf-jab ku ah hanaqaadka iyo koboca warbaahinta maqal-muuqaal baahiyaha.

Dhanka kale yagleelidda Warbaahinta Maqal-Muuqaal baahiyaha ah waxa ay u baahan tahay dhaqaale baaxad leh, hanti ma gurto ah iyo qalab u baahan in si farsamo heer sare ah loo dhiso. Taas oo warbaahinta tartanka kula jirta, gaar ahaan Warbaahinta degel-wareedku, aanay u baahayn hanti baaxadaas leh.

1.3.4 Warbaahinta Filimmada

Warbaahinta filimmada ama soosaarida filimmada oo ah warbaahin ku cusub gudaha Somaliland ayaa noqotay warbaahin aad loo isticmaalo iyada oo aan gaadhsiisnayn heerkii loogu talagalay, ayaa bulshada oo ay ku cusub tahay ay keentaa in la sameeyo filimaan aanay dhawrsanayn anshaxa iyo hiddaha suubban ee Jamhuuriyadda Somaliland. Dhanka kale warbaahinta Maqal muuqaal baahiyaha ah oo isticmaala filimaan ajaanib ah oo lagu turjumay afafka hooyo, filimaantaas oo intooda badan aan waafaqsanayn

hiddaha iyo dhaqanka suubban ee ummadda ku dhaqan gudaha Jamhuuriyadda Somaliland.

1.3.5 Warbaahinta *Internetka* iyo Degel-wareedka

Warbaahinta degel wareegka ah ama *internetka* oo ah mid saamaynteedu si xooggan u kordhayso, ayaa aalaaba lagu dhex baahiyaa warar aan sugnaashiyo lahayn (*fake news*) iyo dacaayado been abbuur ah. Taas oo lagu dhaawacayo cirdiga qofka iyo qaranka, isla markaana keeni karta isku dhac bulsheed iyo mid qaranba.

1.4 Muhiimadda Siyaasadda

Si caqabadahaas kor ku xusan loo suuliyo, waa in la helo siyaasad guud oo dammaanad qaadaysa xoriyatal-qowlka, madax-bannaannida saxaafadda iyo kor-u-qaaddida ku dhaqanka anshaxa saxaafadda iyada oo laga duulayo mabaa'dida dastuuriga ah iyo kuwa caalamiga ah.

Haddaba, Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta JSL waxa ay door laxaad leh ka qaadanaysaa kaalinteeda ah in ay hormood u noqoto saxaafad mihnadyaqaan ah, maaddaama ay hawsheedu tahay adeeg dadweyne, loogana fadhiyo in ay tusaale u noqoto hey'adaha kale ee warbaahineed oo ay ku jiraan kuwa gaarka loo leeyahay dhinaca sugnaanshaha saxaafadda, warbaahinta, wacyigelinta iyo madadaalada.

Waxa kale oo ay Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta JSL fahamsan tahay ahmiyadda warbaahinta qaranka iyo in muwaadiniinta u sinnaadaan addeegsiga Warbaahinta Dawladda. Sidaasi awgeedna waa in ay

ku sifowdo hufnaan shaqo iyo ilaalinta xeerarka dalka iyada oo ku dhaqmaysa mabaadii'da guud iyo anshaxa saxaafadeed ee ay ayideen shuruucda dalka sida in warbaahinta dalwadda loo sinnaado muxaafad iyo mucaaridba. Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta ayaa Jamhuuriyadda Somaliland ugu masuul ah dejinta siyaasaddaha warbaahinta, sida uu qeexayo Xeerka kala Xadaynta Nidaamka Xukuumadda iyo Hay'adaha Madaxa Bannaan (**Xeer Lr. 71/2015**). Xeerkaas oo awood sharci u siinaya Wasaaradda in ay soo saarto siyaasad guud oo lagu horumarinayo saxaafadda dawladda iyo kuwa madaxa-bannaanba, si ay bulshadu u hesho warbaahin soo saarta ama baahisa barnaamjiyo warbaahineed oo lagu kalsoonaan karo, kuna dhisan run, dheelitirnaan, daahfurnaansho iyo dhex-dhexaadnimo. Arrintaas oo keenaysa in la yareeyo caqabadaha haysta guud ahaan warbaahinta Jamhuuriyadda Somaliland.

Ugu danbayn, Siyaasadda Warbaahinta Qaranku waxa ay horumarinaysaa qaybaha kala duwan ee warbaahinta qaranka, islamarkaana dhiirrigelinaysa in iskaashi ay yeeshaan Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta iyo dhammaan daneeyayaasha Warbaahinta si loo suuliyo caqabad kasta oo waxyeelo ku ah hannaanka horumarineed ee Warbaahinta Qaranka.

CUTUBKA LABAAD:

UJEEEDADDA IYO XAYNDAABKA SIYAASADDA

2.1 Ujeeddada Guud ee Siyaasadda

Ujeeddada Guud ee Siyaasadda Warbaahinta Qaranku waa in la dejiyo hannaan guud oo lagu horumarinayo adeegyo Warbaahineed oo waafaqsan shuruucda dalka iyo mabaa'diida caalamiga ah.

2.2 Ujeedooyinka Gaarka ah ee Siyaasadda

Ujeedooyinka gaarka ah ee ay leedahay Siyaasadda Warbaahinta Qaranku waa kuwa hoos ku xusan:

- I. In la dhiirrigeliyo warbaahin xor ah oo madaxbannaan oo dhawrta mihnadda iyo anshaxa.
- II. In la dhiirrigeliyo ururro warbaahineed oo madaxbannaan.
- III. In kor loo qaado wacyigelinta, iyada oo la isticmaalayo qaybaha kala duwan ee warbaahinta, taas oo lagaga hortagayo xagjirnimada, argagixisada, qabyaaladda, tahriibka. iwm
- IV. In Wasaaraddu noqoto hormood iyo tusaale dhanka ku-shaqaynta iyo horumarinta mihnadda warfaafineed, sugnaanshaha xogta iyo faafinteeda iyo gaadhsiinta warbaahinta dadweynaha gudaha iyo kuwa debaddaba, dhawrista anshaxa saxaafadda, dhaqanka mujtamaca iyo diinta, isla markaasina hagto hey'addaha kale ee warbaahineed. In la helo nidaam sugan oo qeexaya doorarka

waajibaad ee kala duwan ee bahda warbaahinta oo la jaan-qaadaya waajibaadka ay dastuurka iyo xeerarka kale jideeyeen.

- V. In kor loo qaado awoodda wax-qabad iyo tan xil-kasnimo ee guud ahaan warfidiyeennada.
- VI. In la xoojiyo hannaanka guud ee wada shaqayneed ee warbaahinta madaxabannaan iyo ta dawladda.
- VII. In warbaahintu door hormoodnimo leh ka qaadato hagaajinta sumcadda iyo faafinta qaddiyadda Somaliland ee gudaha iyo debaddaba.

2.3 Xayn-daabka Siyaasadda

Siyaasadda Warbaahinta waxa lagu dhaqayaa/dabaqayaa dhammaan Warbaahinta kala duwan ee ka hawl-gasha gudaha Jamhuuriyadda Somaliland, kuwaas oo kala ah:

- I. Warbaahinta Maqal-baahiyaha ah
- II. Warbaahinta Qoraalka ah
- III. Warbaahinta Maqal-muuqaal baahiyaha ah
- IV. Warbaahinta Filimmada
- V. Warbaahinta *Internet*-ka iyo Degel-wareedka

2.4 Mabaa'diida Hagaya Siyaasadda Warbaahinta Qaranka

Siyaasadda Warbaahinta waxa hagaya mabaadi' iyo qiyamo qeexan, kuwaas oo hoos ku xusan:

I. Xoriyadda Cabbirka Aragtida

Sida uu dhigayo Qodobka 32aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, muwaadin kasta uu xor u yahay in uu ra'yigiisa ku bandhigi karo qoraal, hadal, muuqaal, suugaan ama qaab kale oo waafaqsan xeerarka dalka. Sidaas darteed, siyaasadda Warbaahinta Qaranku waxa ay dhiirigelinaysaa nidaam ama hab kasta oo qof ama haya'ad ay aragtidiisa/eeda si xor ah ku cabiri karto iyada oo la xaqdhawaryo shuruucda dalka iyo mabaa'dida caalamiga ah ee Warbaahinta.

II. Madax-bannaanida Warbaahinta

Siyaasadda Warbaahinta Qaranku waxa ay dhiirigelin aysaa in la abuurro jawi saamaxaya in warfidiyeennada iyo warbaahintu ay u adeegsadaan warbaahinta si madaxbannaan, si ay bulshada uga haqab-tiraan war xaqiiqda ku salaysan.

III. Horumarinta Xirfadda iyo Aqoonta Mihnada Warbaahinta

Siyaasadda Warbaahinta Qaranku waxa ay tilmaamaysa kobcinta aqoonta iyo xirfada warfidiyeen iyo ururadda warbaahinta Somaliland, haddii ay noqoto heer machad ilaa heer jamacadeed.

IV. Hellida iyo Faafinta War xaqiiq ah.

Siyaasadda Warbaahinta Qaranku waxa ay dammaanad qaadaysaa in bulshada Somaliland hesho warar iyo barnaamijyo xaqiiqo ah oo khuseeya arriimahooda kuwaas oo ku salaysan sugnaan, iyo dhexdhexaadnimo.

V. Isla-xisaabtan iyo Daahfurnaan

Jamhuuriyadda Somaliland waxa ay dammaanad qaadaysaa in ay is horumariso warbaahinta si ay u baahiso barnaamijyo warbaahineed oo lagu kalsoonaan karo kuna dhisan run, dheellitirnaan, daahfurnaan iyo dhex-dhexaadnimo iyo isla xisaabtan.

VI. Kobcinta wacyiga bulsho, aqoonta iyo qiyamka dawladnimada

Siyaasadda Warbaahinta Jamhuuriyadda Somaliland waxa ay dammaanad qaadaysaa warbaahin ka shaqaysa wacyigalinta, oo ku hagta bulshada tubta toosan, taas oo daryeelaya afka soomaaliga kobiciisa iyo meelmarintiisa, dhaqanka soo jireenka iyo dhaxalka aan guurin, ismarkaana bulshada ka kaabaysa dhisidda aqoonta dimuqraadiyadda, ahaanshaha ummadnimo iyo waddaniyadda.

2.5 Xuduudaha Sharci ee Siyaasadda

Siyaasadda Warbaahinta Qaranku waxa ay ku tiirsan tahay Dastuurka Qaranka, xeerarka, qorshayaasha qaranka iyo istraatijiyadda, baaqyada iyo maba'aadidda caalamiga ah. Kuwaas oo hoos ku faahfaahsan:

2.5.1 Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland

Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland Qodobkiisa 32 aad ayaa si guudmar ah u sharaxaya xorriyadda ra'yi-dhiibashada, saxaafadda iyo warbaahinta kale. Farqada 1aad ee Qodobka 32aad waxa ay odhanaysaa “*Muwaadin kasta waxa uu xor u yahay in uu ra'yigiisa ku bandhigo qoraal, hadal, muuqaal, suugaan ama qaab kale oo xeerka waafaqsan.*” Farqada 2aad ee isla qodobkan ayaa odhanaysaa, “*Saxaafadda iyo warbaahinta kale waxa ay ka mid yihiin xorriyaadka asaasiga ah ee ra'yi-dhiibashada, waxa ayna leeyihiin madax-bannaanidooda; way reebban tahay tallaabo kasta oo lagu cabudhinayo; hawshoodana xeer baa nidaaminaya.*”

2.5.2 Xeerka Kala Xadaynta Nidaamka Xukuumada Iyo Haya'daha Madaxa-Bannaan (Xeer no.71/2015)

Xeer no.71/2015 ayaa si faahfaahsan u qeexaya waajibaadka iyo masuuliyadka ka saaran Wasaaradda Warfaafinta Dhaqanka iyo Wacyigalintu JSL in ay dammaanad qaado saxaafad xor ah, kuwaas oo ka duulaya Mabaadiida Islaamka, Qiyamka iyo hiddaha suuban ee bulshada Somaliland.

Xeerku, sida oo kale, wuxuu waajibinayaa in ay Wasaaraddu soo saarto siyaasad guud oo lagu horumarin ayo Idaacaddaha, Wargaysyada, Shabakadaha “*Internet*” iyo muuqaal aragga “TVga” dawliga ah iyo kuwa madaxa-bannaan iyo bixinta ruqsadaha warbaahinta gaarka loo leeyahay.

Dhiirigelinta warbaahin Xukuumadda iyo dadku wada leeyihiin si loo helo warbaahin tayo leh oo xor ah ayaa ah masuuliyad loo xil-saaray Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta JSL.

2.5.3 Xeerka Saxaafadda (Lr. 27/2004)

Sida ku cad Xeerka Saxaafadda Qodobkiisa 3aad ee Xorriyadda Saxaafadda ayaa damaanad qaadaya in saxaafadda aan lagu samayn karin cabudhin iyo in ay reeban tahay wax kasta oo loo qaadan karo faaf-reeb iyo in ay Warfidiyeenada isku abaaauli karaan urur-xirfadeedyo oo leh dallad guud iyo xeer-hoosaad anshax oo midaysan. Taas oo lagamamaarmaan ka dhigaysa in Dawladda JSL soo saarto Siyaasad lagu xaqiijin ayo saxaafad xor ah oo ay hagayso qiyamka suuban ee Islaamku.

2.5.4 Qorshaha Horumarinta Qaranka ee 2aad

Sida ku xusan Qorshaha Horumarinta Qaranka ee 2aad, Dawladda JSL waxa ka go’an in la helo Warbaahin (Raadyowga, Telefishanka, Daabacadaha iyo kuwa aan la daabicin) ka qaybqaadata, door laxaad lehna ka ciyaarta horumarka guud ee dalka gaar ahaan maamul-wanaaga.

Qorshaha Horumarinta Qaranka ee 2aad, sida oo kale wuxuu faahfaahin ayaa in “*Somaliand dastuurkeeda iyo xeerka saxaafaddu si cad ayay u dammaanad qaadayaan xorriyada hadalka iyaga oo aqoonsan in dhismaha,*

kocinta iyo horumarinta saxaafad xor ah oo wax-ku-ool ahi ay lagama maarmaan u yihiin xorriyadda hadalka iyo dimuqraadiyadda. Xorriyadda saxaafaddu muwaadiniinta ma siiso fursad ay hadalka ku cabbiraan oo kali ah, waxaayse door rasmi ah ka ciyaartaa horumarinta mabaadii'da dimuqraadiyadda iyadoo sida oo kale siisa muwaadiniinta fursado ay ku cabiraan aragtidooda la xidhiidha arrimo badan oo muhiim ah iyo sida ay u arkaan in ay tahay in arrimaha qaranka loo maareeyo. Warbaahintu door muhiim ah ayay ka ciyaartaa xidhiidhka u dhaxeeya dawladda iyo ka-qaybgalka bulshada ee hawlaha qaranka. Warbaahintu waxa ay kobcisaa maamul-wanaagga iyo geeddi-socodka dimuqraadyadda.”

Natiijadda Laga filayo Qorshuhu Horumarinta Qaranka ee 2aad, waa “*in wax-ka-beddel lagu sameeyo isla markaana la horumariyo shuruucda warbaahinta, korna loo qaado halbeegyada tayada warbaahinta.*”

2.5.5 Istaraatijadda Fog iyo Qorshe-sannadeedka 2020

Istaraatijiyadda Fog (2020 ilaa 2025) ee Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta JSL ayaa qeexaysa jihada laga rabo in loo maamulo, laguna horumarinyo saxaafad xor oo leh oo ku shaqaynaysa siyaasaddo iyo xeerar waafaqsan Dastuurka JSL.

Qorshe-sannadeedka 2020 ee Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta JSL ayaa qeexaya in Waaxda Qorshaynta iyo Ilastikaddu dardargeliso, isla markaana dhamaystirto Curinta Siyaasadda Warbaahinta, iyada oo ka talo-gelinaysa dhammaan daneyayaasha Warbaahinta ee ay ka midka yihiin: Ururadda Saxaafadda iyo Weriyayaasha, Saraakiisha Warbaahinta Qaabilsan ee Laamaha dawladda iyo Ururada Bulshada.

2.5.6 Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqul-iisaanka

Siyaasaddu Warbaahinta Qaranku waxa ay waafaqsan tahay qodobka 19aad ee Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqul-iisaanka, kaas oo odhanaya *“qofkastaa waxa uu xaq u leeyahay xorriyada ra’yiga iyo aragtida, taas oo ay ka mid yihiin xoriyadaha in la haysto fikradaha aan laga cabsi qabin faragelin iyo in la raadiyo, la helo oo la siiyo macluumaad iyo fikrado iyada oo loo marayo warbaahin kasta iyada oo aan loo eegin soohdimaha.”*

2.5.7 Mucaahadada Caalamiga ah ee Xuquuqda Siyaasadda iyo Madaniga ah

Siyaasadda Waraabinta Qaranku waxa ay ku salka ku haysaa qodobka 19aad (farqadiisa 1aad iyo 2aad) ee Mucaahadada Caalamiga ah ee Xuquuqda Siyaasadda iyo Madaniga ah. Kuwaas oo sheegaya,

- 1) Qof kastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu aaminsando rayigiisa cabsi la’aan.
- 2) Qof kastaa waxa uu xaq u leeyahay xorriyadda hadalka, xuquuqdani waxa ay ka mid noqon doontaa xorriyadda raadinta helitaanka iyo soo gudbinta macluumaadka iyo fikradaha nooc kasta ha ahaato, xuduud kasta yeelato, hadal ahaan, qoraal ama daabacaad, qaab farshaxan ama warbaahin kale oo uu doorto

CUTUBKA SADDEXAAD:

TILMAAMAHA IYO MASUULIYADDA WARFIDIYEENNADA

3.1 Hordhac

Warfidiyeennadu waxa ay ka ciyaarayaan door muhiim ah siyaasadda warbaahinta door muhiim ah kaas oo cutubkani uu tilmaami doono Masuuliyadda ay leeyihiin Warfidiyeennada ka hawl-galaha gudaha Jamhuuriyadda Somaliland.

3.2 Masuuliyadda Warfidiyeennada

Masuuliyadda laga rabo Warfidiyeennadu waa in ay ku aasaasnaataa tiirarka hoos ku xusan:

3.2. 1 Xaqiiq iyo Sugnaansho:

- Warfidiyeennada waxa saaran in ay soo gudbiyaan war iyo **wacaal** ku dhisan xaqiiq iyo sugnaanshiyo. Dhammaan dhinacyada dhacdooyinka wareed waa in la waraystaa si loo gaadho dheellitiranaansho ka hor inta aanay u baahin bulshada.
- Markasta oo dhacdo wareed si khaldan loo soo tebiyo, Warfidiyeenku waa in uu sida ugu dhakhsaha badan u saxo. Raalligelin kasta oo la xidhiidha dhacdada wareed ee khaldan waa in si rasmi ah warfidiyeenku ugu baahiyaa meeshii ay ka baxday.
- Warfidiyeennadu waa in ay ka feejignaadaan wixii ku-tidhi ku-teen ah ama laysla dhexmarayo ee warar ah.
- Warfidiyeennadu waa in ay gaadhsiiyaan bulshada Macluumaad sugan oo xambaarsan Waxbarasho, Wargelin iyo Madadaalo.

- Warfidiyeennadu waa in ay u kala soocaan bulshada wararka iyo aaraada ama afkaarta dadka.

3.2.2 Madax-banaanida iyo dhexdhexaadnimada

- Warfidiyeennadu waa in ay u madax-banaanaad soo gudbinta dhacdooyinka wareed iyaga oo aan qabin cabsi ama faragelin dhanka habka tabinta dhacdooyinka rasmiga ah.
- Warfidiyeennadu waa in aanay qaadan laaluush ama hadiyado looga dan leeyahay faafin war ama xogo kale, taas oo ka lumin aysa dhexdhexaadnimadii waajibka ku ahayd iyo milgaha Anshaxa Saxaafadda.
- Warfidiyeennadu waa in ay dhinacyada aaminsan aragtiyo kala duwan ama khilaaf u dhexeeyo si siman u siiyaan doodaha ay kala qabaan, go'aankana bulshada u dhaafaan.

3.2.3 Daacadnimo

- Warfidiyeennadu waa in ay soo bandhigaan wararka si hufnaan iyo akhlaaq wanaag ku dheehan tahay, iyaga oo ka fogaanaya waxa kasta oo iska hor imaad keeni kara ama loo maleeyo dano shaqsi ah oo lagu lammaaneeyo warka.

3.2.4 Ilaha Warka

- Waxa ay bulshadu xaq ugu leeyihiin Saxaafadda in ay ku muujiyaan wax-soosaarkooda ilo-wareedyada meesha ama cidda ay ka helaan wararka.
- Warfidiyeennadu waa in ay si adag u ilaaliyaan ilo-wareedyada qarsoodiga ah, waxase waajib ku ah in ilwareedyadaasi yihiin kuwa la soo xaqiijiyey runnimadooda iyo in suxufigu ka caddeyn karo Garsoore kaliya hortiisa, hadduu warkaa qarsoodiga ahi noqdo mid xidhiidh la leh arrimo waxyeeleynaya amniga Qaranka.

3.2.5 Faaf-reeb

- Wax faaf-reeb ah laguma sameyn karo wararka ama xogaha kale ee ay War-fidiyeennadu gaadhsiineyaan bulshada, waana waajibaad iyo mas'uuliyad saaran in ay bulshada u gudbiyaan war ku dhisan xaqiiq oo aan isbedel lagu samayn xogta dhabta ah.

3.2.6 Isla-xisaabtanka

- Warfidiyeennadu waa in ay xaqiiqsadaan in warka iyo macluumaadka ay baahin ayaan in ay bulshadu kula xisaabtami doonto, haddii ay noqdaan qaar bulshadu cabasho ka muujiso.

3.2.7 Is-dhaafsiga Xogta

- Saxaafadda waxa xil ka saaran yahay in ay noqdaan isku-xidhaha *[bridge]* bulshada iyo Xukuumadda, iyaga oo tabashooyinka bulshadu qabto u gudbinaya xukuumadda, sida oo kalena bulshada gaadhsiiyaan dareenka xukuumadda.

3.2.8 Arrimaha Dhawrsanaanta Leh

- Diinta Islaamka ee muqaddaska ah, waxa ka xaaraan saxaafadda in ay wax ka sheegaan ama falanqeeyaan, iyaga oo aan kala tashan culimadda aqoonta u leh.
- Warfidiyeennada waxa ka reebban in ay faraha la galaan arrimaha qofka/qoyska u gaarka ah, haddii aanay kellifin arrin dan iyo xiiso-ba u leh qoyska iyo bulshada.
- Saxaafaddu waa in ay ka digtoonaato in ay si yasmo ah u xusaan qofka qabiilkiisa, jinsiyaddiisa, midabkiisa, diintiisa, miyir la'aantiisa iyo caafimaadkiisaba.
- Waxa ku waajib ah Warfidiyeennada in aanay ka hordhicin qaraarrada dacwadaha ka socda Maxkamadaha, waxana reebban in si mas'uuliyad darro ah loo baahiyo doodaha ka socda Maxkamadaha iyada oo aan laga xaqiijin Garsooraha.

3.2.9 Badbaadinta Carruurta

- Warfidiyeennadu waa in aanay markhaati gashan carruurta marka ay soo tebinayaan dhacdooyinka wararka ah.
- Xuquuqda aqoonsiga, faafinta muuqaalka ama hadalka carruurta waa ay dhowrsoon tahay.

3.2.10 Adeegsiga Muuqaaladda iyo Magacayada

- Warfidiyeennadu waa in ay ka taxadaraan isticmaalka sawirada iyo magacyada sababi kara in waxyeello loo geysto dadka ay khuseyso.
- Warfidiyeennada waa in dhawrsadaan in ay sawirada iyo muuqaalada u adeegsadaan qaab ka leexinaya warka xaqiiqada iyo saxnaanta.
- Warfidiyeennadu waa in ka taxadaraan adeegsiga sawirrada xanbaarsan murugada (sida maydka, dhaawacyada halista iwm) iyo kuwa dhiirigeli-naya anshax-xumada.

3.2.11 Duubista Waraysiyada iyo Wada sheekaysiga Telefoonka

- Warfidiyeenka wax ka reeban in uu duubo wada-sheekaysi telefoonka ah iyada oo aanu ka war-qabin ka haysan cida uu waraysanayaa.
- Warfidiyeenku haddii uu rabo in uu duubto wada-sheekaysiga telefoonka waa in uu oggolaansho waydiisto cida uu waraysanayo una sharraxo ujeeddada duubista wada sheekaysiga telefoonka.

3.3 Masuuliyadda Tifaf-tirayaasha

- Tifaf-tirayaasha waxa ay masuuliyadda ka saaran tahay dhammaan wararka iyo macluumaadka ay baahiyaan.
- Tifaf-tiruhu waa in uu madax-banaanaado ka go'aan gaadhista dhisidda xogta warka isaga/iyada oo aan ka cabsi qabin wax faragelin ah, isaga oo ilaalinaya sugnaanshiyaha iyo dheelitirnaanta warka.
- Warfidiyeenku waa in uu ku wargeliyo Tifaf-tiraha ilaha qarsoon ee wararka iyo dhacdooyinka ee uu u soo gudbinayo tifaf-tiraha.

3.4 Xuquuqda Warfidiyeennada

Siyaasadda Warbaahinta Qaranku waxa ay dhiirrigelinaysa in Haya'adaha Warbaahintu ay heshiis qoraal ah la galaan warfidiyeennada ka hawlgala xarumahooda, iyada oo tixgelin la siinayo sinnaanta mihnadda shaqo ee labka iyo dhediga, iyo dadka naafadda ah. Heshiisyada waa in loo raacaa xeerarka shaqaalaha ee dalka JSL.

3.5 Horumarinta Xirfadda iyo Aqoonta Warfidiyeennada

Dawladda JSL waxa ay xil-wayn iska saaraysaa sidii loo kobcin lahaa xirfadda iyo aqoonta warfidiyeennada ka hawl-gala haya'adaha warbaahinta iyada oo taageero siinaysa tababarada aqooneed ee lagu bixiyo goobaha waxbarasho.

3.6 Diiwaangelinta Suxufiga

- Si loo ilaaliyo sumcadda saxaafadda iyo amniga qaranka waxa waajib ah in warfidiyeennada ka hawlgalaya hay'adaha warbaahinta ee ka diiwaangashan Wasaaradda uu leeyahay aqoonta xirfadda suxufinimo, isla mar ahaantaana uu buuxiyo shuruudaha suxufinnimo ee xeerarku jideeyeen.
- Haya'adaha Warbaahin kasta oo ka diiwaan-gashan Wasaaradda Warfaafinta iyo Wacyigelinta waxa ay warfidiyeennada u shaqeeya u soo codsanaysaa kaadhka aqoonsiga suxufinnimo oo ay Wasaaraddu bixinayso marka ay soo gudbiyaan macluumaadka iyo caddaymaha looga baahan yahay. Kaas oo lagu aqoonsanayo magaciisa, mihnaddiisa iyo saxaafadda uu u shaqeeyo, iwm.
- Qofna xaq uma laha inuu ku shaqaysto mihnadda suxufinimo haddii aanu haysan rukhsad (kaadhka) suxufinnimo ee Wasaaradda Warfaafinta JSL.

CUTUBKA AFARAAD:

TILMAAMAHA IYO HANNAANKA HAYA'ADAHA WARBAAHINTA

4.1 Hordhac

Cutubkan waxa uu sharaxaad ka bixinayaa tilmaamaha ay yeelanayaan haya'adaha Warbaahinta Qaranka iyo hannaanka loo maamulayo.

4.2 Noocyada Haya'adaha Warbaahinta

Haya'adaha Warbaahinta JSL waxa ay u qaybsamaan saddex qaybood:

- I. Warbaahinta Dadweynaha
- II. Warbaahinta gaar loo leeyahay
- III. Warbaahin Bulsho

4.3 Tilmaamaha Haya'adaha Warbaahinta

- Dhammaan haya'adaha Warbaahintu waxa ay ka siman yihiin u addeega bulshada.
- Haya'adahan waa in ay ahaadaan kuwo danta qaranka kor u qaada.
- Haya'adahan waxa ay leeyihiin waajibaadyo iyo hannaan u gaar ah oo loo maamulo.

4.3.1 Warbaahinta Dadweynaha

Waa Hay'adaha warbaahineed ee Dawladdu maamusho, oo dhaqaalaha lagu maamulo lacagta cashuur bixiyayaasha Somaliland. Taas oo waajibaadkeedu yahay in ay dadweynaha u fidiso, ama u baahiso adeegyo warbaahineed oo dadweynuhu si bilaash ah ku helaan. Sida oo kalena, addeegyada warbaahineed ay noqdaan kuwo si siman oo dhexdheexaadnimo leh ay u addeegsadaan qaybaha kala duwan ee bulshadu.

4.3.2 Warbaahinta Gaarka loo leeyahay

Waa hay'ad warbaahineed oo kasta oo faa'iido doon ah oo ay maamulaan hay'ad ama cid gaar ahi leedahay, loona abuurey ujeedo ganacsi, kana diiwaangashan gudaha JSL.

4.3.3 Warbaahin Bulsho

Waa hay'adaha warbaahineed ee ay maamusho hay'ad ama cid aan faa'iido ka dooneyn, sida oo kalena ku waajahan qaybo bulshada kamid ah si ay u helaan macluumaadka ay dadkeedu xiiseeyaan ee u gaarka ah.

4.4 Hannaanka Haya'adaha Warbaahinta

Siyaasadda Warbaahinta Qaranku waxa ay qeexaysaa hannaanka guud ee lagu hagayo haya'adaha Warbaahineed ee ka hawlgala Jamhuuriyadda Somaliland.

4.4.1 Warbaahinta Qoraal ah

Siyaasadda Warbaahinta Qaranku waxa ay dhiirigelinaysaa in la helo warbaahin madax-bannaan oo qoraalka ah oo xogta iyo wararka ku soo gudbisa afka hooyo iyo afafka qalaad.

4.4.2 Warbaahinta maqal-baahiye

Siyaasadda Warbaahinta Qaranku waxa xoojinaysaa in la helo warbaahin maqal-baahiye (ama reedhyow) ah oo soo gudbisa Warar xaqiiqada ku salaysan iyo barnaamijyo aqooneed, madadaalo iyo wacyiglineed oo ay saldhig u tahay anshaxa saxaafadda.

4.4.3 Warbaahinta Maqal-muuqaal baahiye

Siyaasadda Warbaahinta Qaranku waxa xoojinaysaa in la helo warbaahin Maqal-Muuqaal baahiye (ama telefishanada) ah oo soo gudbisa Warar xaqiiqada ku salaysan iyo barnaamijyo aqooneed, madadaalo, iyo wacyiglineed oo ay saldhig u tahay anshaxa saxaafadda.

4.4.4 Warbaahinta Degel-Wareed

Siyaasadda Warbaahinta Qaranku waxa ay dhiirigelinaysaa in warbaahinta degel-wareedyadu ay noqdaan warbaahin u madax-banaan baahinteeda wareed oo ay saldhig u yihiin qiyamka iyo akhlaaqiyaadka Islaamiga ah. Sida oo kale, siyaasaddu waxa ay dhiirigelinaysaa in qaybaha kala duwan ee bulshadu isticmaalaan baraha bulshadu ku kulanto iyada oo la dhawrayo akhlaaqiyaadka wanaagsan, kaas oo ka duulaya mabaadida sharci ee uu ugu

horeeyo dastuurka JSL ee muwaadiniinta u damaanad qaadaya xoriyatul qawlka, lagana dheeranayo wararka been abuurka ah iyo dacaayadaha.

4.5 Diiwaangelinta Haya'adaha Warbaahinta

- Noocyada kala duwan ee saxaafaddu waa hay'addo xirfadeed (professional Institutions) oo yeelanaya shakhsiyad qaanuuni ah (legal personality); sidaa darteed, waxa waajib ku ah in ay lahaadaan rukhsad (license) ay ku hawlgalaan. Taas oo ay bixinayso Wasaaradda Warfaafinta, Wacyigelinta iyo Dhaqanka oo dawladda u qaabilsan mihnadaas.
- Haya'adaha Warbaahinta marka ay is diiwaangelinayaan waxay Xafiiska Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Warfaafinta ka qaadanayaan foomka loogu talagalay oo ay ku soo buuxinayaan macluumaadka looga baahan yahay.
- Wax ka reeban in ay gudaha Dalka JSL ka hawlgasho Haya'ad Warbaahineed oo aan ka diiwaangashanayn Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta JSL.

4.6 Lahaanshiyaha Haya'adaha Warbaahinta

Dawladda JSL waxa ay abuuri doontaa jawi ku habboon in ay ku hawlgalaan dhammaan noocyada haya'adaha Warbaahinteed ee kor ku xusan.

4.6 Helitaanka Xogta ee Haya'adaha Warbaahinta

Dawladda JSL waxa ay si joogto ah uga falcelin doontaa baahida wareed ee ay muwaadiniintu qaban, iyada oo tixgelinaysa xaqa ay muwaadiniintu u leeyihiin in ay helaan xog-sugan oo ku saabsan Siyaasaddaha, Barnaamijyada iyo qorshayasha Xukuumadda ee noloshooda taabanaya.

4.7 Nidaamka iyo Anshaxa Haya'adaha Warbaahinta

- Siyaasadda Warbaahinta Qaranku waxa ay dhiirigelinaysaa in ay saxafiyiintu isku abaabulaan ururro/kooxo ka shaqeeya danohooda la xidhiidha mihnada warbaahinta.
- Siyaaada Warbaahinta Qaranku waxa ay dhiirigelinayaa in dhammaan noocyada kala duwan ee Haya'adaha Warbaahintu yeeshaan xeer-hoosaadka Anshaxa Saxaafadda oo la'aantii saxaafaddu ay sumcad beelayso ama ciqaab ku kasban karto.
- Xeer-hoosaadka Anshax Saxaafaddu waa in uu waafaqsanadaa siyaasadaha iyo shuruucda dalka, laguna maamulo warfidiyeennada, barnaamijyadda, wararka iyo guud ahaan shaqada Haya'adaha Warbaahinta.

CUTUBKA SHANAAD:

HIRGELINTA, QIIMEYNTA & DIB-U-EEGISTA

SIYAASADDA

5.1 Hirgelinta Siyaasadda

Hirgelinta Siyaasadda Warbaahinta Qaranku waa masuuliyad si wadareed u saaran dhammaan haya'adaha warbaahinta, ururada saxaafadda iyo warfidiyeenadaba. Xil gaar ah waxa uu ka saaran yahay Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta JSL in ay fuliso, isla markaana ku maamusho qaybaha kala duwan ee warbaahinta dalka ka hawlgasha.

Si loo helo Siyaasad Warbaahineed oo u dhaqan-gasha sida ugu habboon, waa in dhammaan qaybaha warbaahintu si midnimo leh uga wada shaqeeyaan danta iyo gaadhista in la helo warbaahin xor ah, oo soo tebisa warar xaqiiq ah, kana jawaabta baahida wareed iyo xaqa helitaanka xogta. Sidaas darteed, waxa habboon in la xoojiyo barnaamijiyada horumarinta adeegyada Warbaahineed ee hadda jira oo ay ka mid yihiin tayaynta iyo tababaradda kor loogu qaadayo warfidiyeennada, si loo helo saxafiyiin aqoon u leh hawlaha ay u hayaan qaranka. Taas oo kor u qaadi doonta tayada warbaahinta hadda jirta, oo aan gaadhsiinaysa heer kii loo baahnaa.

5.2 Kormeeridda iyo Qiimeynta Hirgelinta Siyaasadda

Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta JSL waxa ay kormeer joogto ah ku samayn doontaa hirgelinta Siyaasadda, iyada oo kaashan doonta Ururadda Warbaahinta iyo daneeyayaasha kale duwan. Waxa ay soo saari doontaa warbixino kormeer oo lagu bandhigi doono heerka madax-bannaanida saxaafada, caqabadaha iyo fursadaha warbaahinta. Warbixintaas waxa ay noqon **doonta mid sannadle ah**.

Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta JSL waxa ay dejin doonta nidaam lagu qiimeeyo hir-galinta Siyaasadda. Nidaamkaas oo lagu salayn doono qorshaha iyo istaraatijadda Siyaasadda, iyada oo si muddayn (**halkii sannoba mar**) u soo saari doonta Warbixin Qiimayn oo faahfaahsan.

5.3 Diyaarinta Istratijiyadda iyo Qorshaha Siyaasadda

Si loo hirgaliyo Siyaasadda Warbaahinta Qaranka, isla markaana ay Warbaahinta kala duwani uga ciyaaraan doorka ay ku leeyihiin Siyaasaddan, Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta JSL waxa ay mudnaanta siin doontaa in la helo istratijiyadda muddada fog iyo qorshe laga dheegto habka fullinta Siyaasadda Warbaahinta. Qorshahaas oo hay'ad kasta ku waajibin aya in ay abuurto qorshe-gaar ahaaneed oo lagu hirgelinayo Siyaasadda.

6.4 Dib-u- eegista Siyaasadda

Siyaasadda Warbaahinta Qaranka waxaa lagu samayn doonaa dib-u-eejis iyo wax-ka-badalba **shantii sanno hal mar**, ama marka ay timaado baahi lagamamaarmaan ka dhigaysa in isbeddel lagu sameeyo.

Waaxda Qorshaynta iyo Istatistikadda

Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta ,

Email: directorofplanning@warfaafintajsl.com | **Tell:** + 252634100120

Web: www.warfaafintajsl.com

Cinwaan: Degmadda 26ka June, Wadadda Idaacadda